**SHARCI Lr. 16** TAARIIKH: **27/06/2016**

**DHISMAHA GUDDIGA MADAXBANAAN
EE XUQUUQUL INSAANKA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY**: Qodobada 41aad, Faqradahiisa 1aad iyo 2aad, 111B ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY**: Baaqa Caalimiga ee Xuquuqul Insaanka ee Soomaaliya qayb tahay iyo Midowga Afrika.

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 1298/3/1/9/16 ee 06/06/2016 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxabanaan Ee Xuquuqul Insaanka

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo la dhiso Guddiiga Madaxbanaan ee Xuquuqul Insaanka si looga hortago gaboodfal kasto ee Wax u dhimaayo xuquuqda muwaadaniinta Soomaaliyeed.

**Waxuu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxbanaan ee Xaquuqul Insaanka.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**Muqdisho 27/06/2016**

**Madaxwaynaha J. F.S**
**Xasan Sheekh Maxamuud**

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

**Ref:** 1298/3/1/9/16:الرقم

**Mogadishu,** 6th June 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Og: Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Aadanaha
Muqdisho.

---

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Guddiga Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Arrimaha Bini'aadanimada
L/H. Golaha Shacabka

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

---

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

---

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga Lagu Dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Lagu Dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee fadhigiisii 14aad ee 6dii Juun 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 145 (Boqol Afartan iyo Shan) Xildhibaan
- Xildhibaan diidey: 3 (Saddex) Xildhibaan
- Xildhibaan ka aamustay 5 (Shan) Xildhibaan

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

MJ/AM

# ANSIXINTA SHARCIGA LAGU DHISAYO GUDDIGA MADAXABANNAAN EE XUQUUQUL INSAANKA.

| Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 153: Oggol (145) Diidmo (3) ka aamustay (5) | |
| Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari" | Taariikh: 6th June 2016 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar | Taariikh: 6th June 2016 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: 6th June 2016 |

Federal Republic of Somalia
House of the People
Committee of Human Rights, Women
and Humanitarian Affairs

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
لجنة حقوق الإنسان والمرأة
والشؤون الإنسانية

JamhuuriyaddaFederaalkaSoomaaliya
GolahaShacabka
GuddigaXuquuqulInsaanka, HaweenkaiyoArrimahaBani'aadanimada

**Tix:** /GXIGSH/02/2016 **Taariikh:**13.02.2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Ujeeddo: Warbixinta Guddiga Xuquuqu lInsaanka ee ku Saabsan Akhrinta 3aad Sharciga Lagu dhisayo Guddiga Madaxa-banaan ee Xuquuqul Insaanka

MudaneGuddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaa sharaf weyn inoo ah in aan Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka lagu Dhisayo Guddiga Madaxa bannan ee Xuquuqul Insaanka aan u soo gudbino Guddoonka iyo Xildhibaannada Golaha Shacabka, M.ne Guddoomiye Hindisahan wuxuu soo maray heerar kala-duwan. Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu ka mid yahay Guddiyada uu Dastuurka ina farayo sameeyntiisa sida ku cad Qodobka 111aad Faqraddiisa (B) wuxuuna Guddiga u xilsaaran yahay:-

1. Horumarinta xushmeynta xuquuqda Aadamiga iyo dhaqanka xuquuqda Aadamiga
2. Horumarinta ilaalinta , xoojinta iyo adkeeynta xuquuqda aadamiga; iyo
3. Baaritaanka iyo qiimeeynta habdhaqanka xuquuqdaada aadamiga ee

   Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Mudane Guddoomiye,
Mudaneyaal.

Waxaa Hindise sharciyeedka bilowgiisii hore gacan ka geeystay soona diyaariyay Wasaaradda Caddaaladda waxaana markii dambe la wareegtay Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka. Waxaa Hindisahan Golaha Shacabka loo soo gudbiyay Taariikhdu marka ay ahayd 25[kii] May 2013, Wuxuu maray akhrintii 1aad 30[ka] May 2013 sida waafaqsan Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, Waxaa loo

soo gudbiyay Guddiga Baarlamaanka ee xuquuqul Insaanka, haweenka iyo arrimaha bani'aadanimada ka dibna Guddiga wuxuu wadatashi la sameeyay qaybaha kala duwan ee Bulshada si ay fikirkooda ugu biiriyaan Sharciga lagu dhisayo Guddiga Xuquuqul Insaanka ka dib wuxuu Sharcigani maray Akhrintiisa 2aad taariikhdu marka ay ahayd 10kaJuun 2013.

Guddigu wuxuu mahad gaar ah u jeedinayaa Xafiiska Guddoonka Barlamaanka taageeradii niyadda ahayd , wada shaqeeynta iyo dhiiri-gelinta uu na siiyay.

Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa Hay'adda Hormarinta Haweenka ee IIDA Iyo Khubarada Caalamiga ah ee ay ku taageertay Guddigan Inta uu ku hawlanaa diyaarinta Warbixinta Akhrinta 3aad ee Sharcigan iyo sidii loo waafajin lahaa qaraarka golaha guud ee Qaramada midoobay ee soo baxay 20ka December 1993, kaas oo qeexaya mabaadi'da la xiriirta hay'adaha qaranka ee Xuquuqul Insaanka ee dunida looga yaqaan mabaadi'da Baariis.

Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa UNSOM oo guddiga ka tageeray hirgelinta wadatashi loo qabtay Wasaaradaha Xuquuqul Insaanka ee Maamul Goboleedyada la dhameystiray iyo kuwa aanan wali loo sameeynin kuwaas oo ay kaga qaybgaleen xubno ka socda, waxaa wadatashiga lagu qabtay Magaalada Muqdisho Taariikhdu marka ay ahayd 02dii-4tii Novembar 2015. Guddiga wuxuu Hindisahan ku biiriyey dhammaan fikradihii laga soo uruuriyey qeybihii aan la yeelanay wadatashiyada ku saabsan Hindisahan.

MudaneGuddoomiye,
Mudanayaal,

Hindise Sharciyeedkani wuxuu Golaha horyaalaa muddo badan wuxuuna Guddigu ku bixiyay dadaal badan siddi uu u noqon lahaa sharci ay tallo ku leeyihiin dhammaan Maamullada dalka. Sidaas daraadeeda, waxaan si xushmad leh Xubnaha Golaha Shacabka uga codsanayaa inay waajibaadkooda qarameed ka gudataan ayna ansixiyaan sharcigan.

Mahadsanidiin.

Xil. Maryan Aweys Jaamac
Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka
Haweenka & Arrimaha Bani'aadanimada.

Tell: +252 618446274 Email: mariam_on@hotmail.com
Website: www.sfp.so

Jamhuuriyadda
Federaaliga ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جـمـهـوريـة الصـومـال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

**The Federal Government of the Somali Republic**
**Office of the Prime Minister**

Ref: XRW/GB/ 00.256/05/13 Maalinta: 17/05/2013

**KU: Guddoomiyaha baarlamaanka Federaalka J. F. S.**
**Muqdisho.**

**Ujeeddo: Gudbin Qabya-Qoraal Xeerar kala duwan.**

Mudane Guddoomiye waxaan halkan kuugu soo gudbinyaa qabyo-qoraal hindise sharciyeedyo ku saabsan arrimo kala duwan. Waxayna kala yihiin:

1- **Hindise Sharciyeedka Golaha Adeegga Garsoorka.**
2- **Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Xaduudaha iyo Federaalka.**
3- **Hindise Sharciyeedka Guddiga Xuquuqda Aadanaha.**
4- **Hindise Sharciyeedka Dhismaha Xafiiska Gardoonka/ Ilaaliyaha Dadweynaha.**
5- **Hindise Sharciyeedka Guddiga Dib-u-eegidda iyo Hirgelinta Dastuurka.**
6- **Hindise Sharciyeedka Dhismaha Maxkamadda Dastuurka.**
7- **Hindise Sharciyeedka Shaqada Arrimaha Dibadda.**
8- **Hindise Sharciyeedka La-dagaalanka Argagixisada.**

Mudane Guddoomiye, Waxaan si sharaf leh kaaga codsanaynaa meelmarinta hindise sharciyeedyadan kor ku xusan, maadaama baahi weyn loo qabo ku-dhaqankooda marxaladan hadda dalku ku suggan yahay.

Warqaddaan waxaa ku lifaaqan dhammaan sideed (8) Hindise Sharciyeed.

Wada-shaqayn wacan.

**Mudane Cabdi Faarax Shirdoon**
**Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda J. F. S.**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
XAFIISKA RA'IISULWASAARAHA

+252 1-659271-659326 +2525-941037 Fax +2525-941017 E-mail: opmtfg@gmail.com Mogadishu, Somalia

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Xukuumadda Federaalka
Wasaaradda Garsoorka, & Arr. Diinta, Dasturka,
Dib u heshiisiinta iyo Fedraalka
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدينية والدستور
والمصالحة الوطنية والفدرالية
مكتب الوزير

**The Federal Government of the Somali Republic**
**Ministry of Justice, Religious Affairs, Constitution, Federal and Reconciliation**
**Office of the Minister**

**REF:WGADDDHF/XW/D-8/136/2013** **Date: 13/02/2013**

**KU: MUDANE DR. CABDI FAARAX SHIRDOON**
**RAIISUL WASAARAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**XARUNTIISA**

**Ujeeddo: Soo gudbin Sharciga Guddiga Xuquuqda Aadanaha**

Mudane Ra'iisul wasaare, waxaan halkaan ku soo lifaaqaynaa Mashruuca Sharciga dhismaha Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo ku xusan Qod41aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya, si aad u aragto uguna bandhigto Golaha Wasiiradda.

Annagoo tixgelinayna faritaankaaga iyo xaaladda xuquuq Aadanaha meesha ay mareeyso maanta dalkayna, ayaa keentay in aanu si deg deg ah u diyaarino sharcigaan, annaga oo dadaal badan ku bixinay, Golahana ka sugayna inuu wixii wax ku dar ama ka reebid ah ku sameeyo

Sharcigaan wuxuu waafaqsanyahay Dastuurka & shuruucda la midka ah ee Dowladaha Gobolka.

Annaga oo ku rajawayn in la ansaxiyo Sharcigaan, adiga iyo Golaha Wasiiraddu naga Gudooma salaan wacan.

Xildh. Abdullahi Abyan Nur
Wasiirka Wasaaradda

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
SOMALI FED. REPUBLIC
MINISTRY OF JUSTICE, RELIGIOUS AFFAIRS, CONSTITUTION, FEDERAL & RECONCILIATION
WASAARADDA GARSOORKA, ARR. DIINTA, DASTUURKA, DIB U HESHIISIINTA & FEDERAALKA

Tel: +252615572274, Email. justicesom@hotmail.com

# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## SHARCIGA LAGU DHISAYO GUDDIGA MADAXABANNAAN EE XUQUUQUL INSAANKA

Sharci Lr: _____________ ee __________
Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka

## Qodobka 1aad:
## Cinwaanka

Sharcigan waxaa loogu magacdaray Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabaannan ee Xuquuqul Insaanka

## Qodobka 2aad:
## Macneynta ama Sharraxaada

Haddii aan Sharcigan gudihiisa si ka duwan loogu qeexin erayga:
**"Xuquuqul Insaanka":** waxaa loola jeedaa Xuquuquda iyo xurriyaadka aasaasiga ah ee Aadanaha ku dhowraarsan Dastuurka Jumhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya, Shareecada Islaamka, Heshiisyada Caalamiga iyo kuwa gobolleed oo ay Dowladda Soomaliya ay qayb ka tahay,
**"Guddiga kmg xulista murashaxiinta":** waxaa loola jeedaa guddi hoosaad jiraaya muddo cayman xilkiisuna yahay fulinta hannaanka xulista musharaxiinta soo codsaday in ay ka mid noqdaan xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka,

**"Guddi Xeer-beegti":** waxaa loola jeedaa guddi la magacaabo hadba markii loo baahdo si ay ugu xaqsooraan ama u dhexdhexaadiyaan ama talada haboon ka soo jeediya cabashooyinka la xiriira Xuquuqda Aadanaha.

## Qodobka 3aad:
## Aasaaska Guddiga

1. Sharcigani waxaa lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qoddobada 41 iyo 111B ee Dastuurka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Guddiga wuxu yeelanayaa shakhsiyad qaanuuneed oo uu ku saxiixi karo heshiisyo leh awood qaanuuneed oo u fududeenayo howlaha lagama maarmaanka u ah habsami u socodka iyo xilgudashadiisa si waafaqsan sharcigan,
3. Guddiga wuxuu awood u leeyahay inuu yeelan karo, iibsan karo, iskana iibin karo hantida guurtada iyo maguurtada; iyo
4. In uu sameysan karo astaan iyo shaabad u gaar ah.

## Qodobka 4aad:
## Xarunta Guddiga

1. Xarunta Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka waxay noqoneysaa Muqdisho, caasimadda Jamhuuriyadda Federaalkaa ee Soomaaliya.

2. Guddiga Madaxabanaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu hawlihiisa ku fulin karaa kuna maamuli karaa meel kastoo kale oo ka mid ah Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya gudahiisa.

## Qodobka 5aad:
## Xilalka iyo Howlaha Guddiga

Xilalka iyo Howlaha Guddiga waxaa ka mid ah:

1. Horumarinta iyo kor u qaadidda dhaqan ku saleysan aqoonta iyo xurmeynta qiyamka XuquuquI Insaanka ee waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka Federaalka iyo Xeerararka Caalamiga ee Xuquuqul insaanka ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay;
2. In uu sugo dhammaan Nidaamyada-siyaasadeed ee Dowladda iyo shuruucdaba ay waafaqsan yihiin mabaa'diida Xuquuqul Aadanaha ee ku xeerisan Dastuurka Federaal iyo qiyamka Heshiisyada iyo Shuruucda Caalamiga ah;
3. In uu soo booqdo xarumaha maxaabiista si sharci ah ku xukuman ay ku xiran yihiin, oo ay ku jiraan xarumaha ama meelaha lagu hayo dadka aan weli la maxkamadeyn (rumaanka) iyo meelaha kale ee laga shakisan yahay in si sharci darro ah dad ugu xiran yihiin iyadoo kormeeradaasi looga gol leeyahay in la qiimeeyo hadba talada habboon ay ka soo bixiyaan xaaladaha maxaabiista iyo la-heystayaasha ay ku sugan yihiin;
4. In uu qabto cabashooyinka ku saabsan ku xad gudubka xuquuqal insaanka isla markaana ku sameeyo baaritaan hay'adaha xadgudbay ha ahaadeen hay'adaha Dowladda guud ahaan iyo kuwa Xukuumadda hoos taga ama kuwa gaar ahaaneed, kadibna ay soo saaran xalka ku habboon ee lagu saxayo xadgudubyada la xiqiijiyey;
5. In uu baaro Xadgudubyada lagula kaco kooxaha nugul oo ay ka mid yihiin Haweenka, dadka taagdaran, dadka baahida gaar ah qaba (Naafada), Waayeelka, Caruurta guud ahaan, iyo kuwa lagu biiriyey kooxaha hubeysan gaar ahaan;
6. In uu sameeyo baaris guud una ugu kuurgalayaan xadgudubyada Xuquuqal Insaanka la joogteystay ama la caadeystay;
7. In uu diyaariyo war-bixino una gudbiyo Baarlamaanka, Ururada Xuquuqul Aadanaha ee Gobolka , kuwa Caalamiga iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso arrimaha Xuquuqul Insaanka oo ay ku jiraan talo soo jeedin sida dastuuriga ah.
8. In uu hormariyo kuna dhiirrigeliyo hay'adaha Dowladda iyo kuwo gaarka ahba ilaalinta, dhowrista iyo ku dhaqanka mabaa'diida aasaasiga ah ee Xuquuqul Insaanka;
9. In uu kaashado lana xiriirro ururada ku lug leh ilaalinta iyo difaaca Xuquuqul Insaanka;
10. In uu qabto wixii howl ah ee oo kale uu Guddigu u arko in aan looga maarmin horumarinta iyo ilaalinta xuquuqul insaanka, si waafaqsan Dastuurka Federaalka; iyo
11. In uu fuliyo xilal kastoo kale ee Dastuurka Federaalka ama Shuruucda Dalka u xilsaaraan iyo inuu qaado hadba tallaabada haboon ee lagu hormarinayo

ilaalinta, dhiirrigelinta iyo ku dhaqanka mabaa'diida iyo qiyamka Xuquuqul Aadanaha.

**Qodobka 6aad:**

**Awoodaha Guddiga**

Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka si waafaqsan Qodobka 41 iyo Qodobka 111B ee Dastuurka, wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

1. In uu dejisto Xeer Hoosaadkiisa, Qodobbada dhaqan-wanaagga xilgudashada xubnihiisa (Code of Conduct);
2. In uu u yeeri karo cid kasta oo uu Guddigu u arko in gacan ka geysan karo xilgudashada iyo fulinta howlaha Guddiga;
3. In uu dhageysto kana garnaqo cabashooyinka iyo arrimaha ku saabsasn Xuquuqul Insaanka asaga oo u maraya hab-dhaqameedka dhexdhexaadinta, maslaxeynta iyo heshiisiinta.
4. In uu si sharciga waafaqsan u marro haleelidda xog-kasta oo uu u arko iney muhiim u tahay xilgudashadiisa xogtaasoo ay ka mid yihiin warbixinno, hadal-qoraallo, dokuminti, ama xog kastoo kale oo laga heli karo shaqsi ama hay'ad ama Xafiisyo dowladeed, haddii duruufaha helitaanka xogta ay khasab noqotana in uu u marro amar maxkamadeed u fasaxaya gelidda xarun ama dhul ama milkiyad kasta iyadoo ujeeddadu tahay in la haleelo agab ama baaris la xiriira xog lagama maarmaan u ah howlaha Guddiga ama suurtogelinaya inuu nuqullo ka sameysto dokominti iyo ilaalinta bedqabka xogta iyo milkiyadda.
5. In uu kaashado ama kala tashado qof ama hay'ad kasta oo aqoon-xirfadeed u leh arrimo lagama maarmaan u ah habsami u gudashada xilka Guddiga;
6. In uu wareysi la yeesho shakhsi ama koox xog-ogaal u ah arrimo Guddiga horyaala;
7. In uu baaris ku sameyn karo hay'adaha dawladeed ama kuwa gaar ahaan loo leeyahay si uu ugu kuurgalo ilaa iyo heerka hay'adaha uu ka hirgalay ku dhaqanka iyo ilaalinta mabaa'diida Dastuurka Federaalka ee ku saabsan u-dhammaashaha, isu-dheelitirnaanta, cadaaladda iyo u-sinnaanta helidda fursadaha howlgalka hay'adda;
8. In uu hay'adaha dowladeed ama kuwa gaar ahaanta loo leeyaha ka dalbado warbixinno la xiriirta sida ay hay'adaha u fuliyeen mabaadii'da sinaanta iyo isu-dheelitirnaanta jinsiga iyo habka ay u adeegto.

**Qodobka 7aad:**

**Qaab-dhismeedka Guddiga.**

1. Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu ka kooban yahay Sagaal (9) Xubnood si waafaqsan Qodobka 111B (4) ee Dastuurka Federaalka, oo Saddex (3) xubnood ka mid ah Guddiga waa iney noqdaan haween iyo hal (1) xubin oo ka timaada dadka baahida gaarka ah qaba (Naafo).

2. Guddiga wuxu yeelanayaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xoghaye oo xubnaha iska dhexdooranayaan, kulankiisa ugu horeeya waxaa shir guddoominaya xubinta ugu da'da weyn.

3. Haddii Guddoomiyaha Guddiga loo doorto xubin rag ah Guddoomiye Ku-xigeenka waa iney noqotaa haweeney. Haddiise haweeney loo doorto Guddoomiye Guddoomiye Ku-xigeenka waa inuu rag noqdaa.

4. Muddada xil-heynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka waa hal xilli oo dhan Afar (4) sano waxaana la cusbooneysiin karaa hal mar oo keliya.

5. Guddiga wuxuu sameysanayaa qaab-dhismeedka xafiisyadiisa maamuleed ee howl-fulinta.

## Qodobka 8aad:
## Shuruudaha Xubinnimada Guddiga.

1. Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka waxaa xubin ka noqon kara qofkii buuxiya shuruudaha soo socda:
    a. In uu yahay muwaadin Jumhuuriyadda Soomaaliya;
    b. In uu haysto Shahaado Jaamacadeed la aqoonsan yahay oo la xiriirta qaybaha culuumta soo socda:
        i. Shareecada iyo Fiqiga,
        ii. Arrimaha Maamulka idaariga,
        iii. Dhaqaalaha iyo Maaliyadda,
        iv. Diblumaasiyadda iyo Xiriirka Caalamiga,
        v. Culuumta jinsiga iyo horumarinta bulshada
        vi. Arrimaha Xuquuqul Aadanaha,
        vii. Wixii kale oo shahaadooyin uu ku takhasusay ama waayo aragnimo kale u leeyahay.
    c. In uu soo qabtay xilal iyo howlo gaar ah uu soo qabtay.
    d. In uu buuxiyey Shuruudaha ku xusan Cutubka 10aad ee Dastuurka Federaalka.
    e. In uu buuxin karo Shuruudaha aasaasiga ah ee dhaqan-wanaagga xilgudshada shaqada, sumcad-wanaagga iyo ka dhowrsanaanta musuqa oo ay shuruucda dalka xeeriya.
2. Ka mid noqoshada Guddiga waxaa ka reeban:
    a. Qof aan muwaadin Jamhuuriyadda Soomaaliya ahayn;
    b. Shaqsi kasta oo xubin ka ah Baarlamaanka Federaalka ama xubin ka ah Baarlamaannada Dowladaha xubinta ka ah Federaalka Soomaaliya ama ka tirsan maamullada dowladda Federaalka ama kuwa dowladaha xubinta ka ah ama Dowladaha Hoose ee degaannada.

c. Shaqsi ku xadgudbay Dastuurka Federaalka ama gaboodfal awgeed xil-xafiiseed looga qaaday ama baaris dembiyo ciqaab lagu muteysanayo ku socota.

## Qodobka 9aad:
## Xilalka Xubnaha Guddiga

1. Guddoomiyaha waa Madaxa Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuuna u xilsaaran yahay:
   a. Isugu yeeridda iyo guddoominta kulamada Guddiga;
   b. Hagidda iyo u kuurgelidda qorshe hawleedka Guddiga;
   c. Xoojinta iyo joogteynta xiriirka shaqo ee ka dhexeeya Guddiga Xuquuqul Insaanka iyo hay'adaha heerarka kala duwan ee Dowladda Federaalka iyo hay'adaha gobolleed iyo kuwa caalamiga ah;
   d. In uu guddoomiyo kulamada Guddiyada Xeer-beegtida, oo uu hadba goortii loo baahdo Guddigu dhiso, si loo dhageysto loona gar-beego cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada Xuquuqul Insaanka, ayadoo go'aan kasta oo Guddiga xeer-beegtida gaaro dib-u-eegis ku sameyn karaan maxkamadaha awoodda u leh oo Sharcigu tilmaamay;
   e. Waa af hayeenka Guddiga rasmiga ah ee Guddiga; iyo
   f. In uu fuliyo waajibaadka kale uu Dastuurka iyo Sharcigu u xilsaaro.
2. Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu u xilsaaran yahay:
   a. Howl kasta oo u xilsaaro Guddoomiyaha Guddiga;
   b. Inuu qabto xilalka iyo waajibaadka Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama ku timaado xaalad xilgudasho la'aan joogto ah;
3. Xoghayaha Guddiga wuxuu u xilsaaran yahay:
   a. Keydinta iyo xafidaada dhammaan dokumintiga Guddiga;
   b. Qoraallada iyo warqadaha ka baxaya xafiiska Guddiga, oo ay ka mid yihiin qoraallada isugu yeeridda kulamada Guddiga, asagoo kala tashanaya Guddoomiyaha Guddiga una fulinaya hadba sida uu u tilmaamay Guddoomiyaha Guddiga.
   c. Gudbinta go'aannada Guddiga uuna gaarsiiyo xubnaha iyo xoghaynta guud ee Guddiga.

## Qodobka 10aad:
## Agaasimaha Guud ee Guddiga

1. Agaasimaha Guud ee Guddiga waxaa lagu magacaabayaa si waafaqsan Qodobka 117 ee Dastuurka Federaalka iyo Shuruucda Shaqaalaha Dowladda wuxuuna ku imanayaa tartan furan si waafaqsan Qodobka 118 (5) ee Dastuurka Federaalka.
2. Shuruudaha qofka loo magacaabayo xilka xafiiska Agaasinka Guud ee Guddiga waxaa ka mid ah:
   a. In uu yahay muwaadin Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b. In uu leeyahay Shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;

c. In uu ugu yaraan Toban (10) sano waayo-aragnimo ku leeyahay arrimaha Xuquuqul Insaanka, iyo in uu hore u soo qabtay xilal Maamul iyo Maareyn heer sare ah;
d. In uu buuxiyey Shuruudaha ku xusan Cutubka 10aad ee Dastuurka Federaalka iyo Shuruudaha aasaasiga ah ee dhaqan-wanaagga xilgudshada shaqada, sumcad-wanaagga iyo ka dhowrsanaanta musuqa oo ay shuruucda dalka xeeriya.

3. Agaasimaha Guud ee Guddiga waa Madaxa fulinta maamulka ee Guddiga waana howl-wadeenka ugu sareeya oo u xilsaaran xafiisyada maamulka Guddiga, waxaana mas'uuliyadiisa toos ula xisaabtamaya Guddiga. Xilalka iyo howl qabashada Agaasimaha Guud fulinayo iyo howlaha kale hadba guddigu u xilsaaray waxaa lagu qeexayaa warqadda magacaabistiisa.
4. Muddada xilheynta Agaasimaha Guud ee Guddiga waa Afar (4) sano oo hal (1) mar keliya loo cusbooneysiin karo.
5. Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu Agaasimaha Guud xilka ugu qaadi karaa:
   a. Haddii xilka xafiiska uu la gudan waayo caafimaad-darro awgeed;
   b. Haddii uu ku kaco asluub-xumo;
   c. Haddii laga helo howlkarnimo-xumo ama xil-gabid;
   d. Haddii uu Dastuurku ku xadgudbo;
   e. Haddii maxkamad awood u leh ku xukunto fal dambiyeed ciqaab lagu muteysanayo.
6. Agaasimaha Guud inta aan xilka looga qaadin arrimaha ku xusan Faqradda 5aad ee Qodobkan wuxuu xaq u leeyahay:
   a. In Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaan uu qoraal ahaan ugu wargeliyo arrimaha lagu soo eedeeyey; iyo
   b. In fursad ku filan loo siiyo inuu qof ahaan iska difaaco eedeymaha lagu soo oogay ama u xilsaarto qareen ka difaaca hadba sidii uu doorbido.

**Qodobka 11aad:**

**Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Guddiga**

1. Guddigu wuxuu qoran karaa hadba hawlwadeenada iyo shaqaalaha lagama maarmaanka u ah habsami u gudashada xilalka iyo hawlaha sharcigan loogu igmaday, si wafaqsan Dastuurka iyo sharciga shaqaalaha Rayadka ah ee Dawladda.
2. Guddiga haddii habsami u fulinta hawlihiisa awgeed uu Dawladda Federaalka uga baahdo in dulsaar ahaan lagu soo wareejiyo hawlwadeeno ka tirsan shaqaalaha joogtada ah ee laamaha dawladda, Dawladda Federaalka waxay fududeyneysaa codsiga Guddiga.
3. Hawlwadeennada iyo shaqaalaha dulsaar ahaan loogu soo wareejiyey Guddiga muddada ay fulinayaan xilalka iyo hawlaha Guddiga waxay la mid yihiin lana xuquuq yihiin hawlwadeenada iyo shaqaalaha Guddiga waxayna u

hoggaansamayaan sharcigan iyo xeer-hoosaadka, xeerka dhaqan-wanaagga shaqada iyo fulinta awaamiirta Guddiga.

**Qodobka 12aad:**

**Xasaanadda Xubnaha iyo hawlwadeenada Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga Xuquuqul Insaanka waxay yeelanayaan xasaanad la mid ah xasaanadda xildhibaanada qaranka ee ku xusan Qodobka 70aad ee Dastuurka Federaalka.
2. Hawlwadeennada iyo shaqaalaha Guddiga Xuquuqul Insaanka laguma soo oogi karo dacwad madani ama fal-dambiyeed ama hawlgabid la xiriira xilgudashadooda oo fal ula kac ahayn kana unkama ayagoo niyadsami u fulinaaya hawlaha Guddiga.

**Qodobka 13aad:**

**Shaabadda caadiga ah ee Guddiga**

1. Shaabadda caadiga ah ee Guddiga waa in loo xafidaa hadba sida Guddigu tilmaamo waana in aan loo adeegsan si ka duwan awaamiirka Guddigu tilmaamay.
2. Dukumentiga iyo qoraallada oo laa saaray shaabadda Guddiga lana tasdiiqiyey waxay noqoneyaan kuwo sharciga hortiisa rasmi ku ah haddii aan loo caddeyn si ka duwan oo ku lid ah.

**Qodobka 14aad:**

**Shirarka Guddiga**

1. Guddigu waa inuu ugu yaraan saddexdii biloodba hal mar, wuuna ku kulmi karaa muddo intaa ka yar hadba siduu u arko in ay haboon tahay.
2. Guntanka go'aan qaashada Guddigu wuxuu ansaxaya kalabarka tirade xubnaha Guddiga iyo haldheeri (50+1);
3. Go'aamada Guddiga intii suurtogal ah waxaa lagu gaaraya wadar oggol, haddii la waayo waxaa lagu gaaraya tiro hal dheeri ah. Haddii codeyntu barbardhac noqotana waxay aqlabiyaddu raacaysa dhankii Shir Guddoomiyuhu codkiisu u rido.

**Qodobka 15aad:**

**Guddiga kmg ee Xulista Murashaxiinta**

1. Si waafaqsan Qodobka 111 (2) ee Dastuurka Federaalka, Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Xuquuqul Insaanka wuxuu muddo 30 beri guduhood ku dhisayaa, asagoo la tashanaya Dowlad Gobolleedyada, hey'addaha bulshadda iyo Maamul Gobolleedyada kmg ah kana codsanayo iney soo magacaabaan sagaal iyo toban (19) xubin oo ka mid noqdaan Guddiga kmg ah ee xulista murashaxiinta:
    a. Dowlad/Maamul Gobolleed (kmg ah) walba waxay soo gudbineysaa min laba (2) xubin ayaga oo la tashanaaya Hay'addaha Bulshadda ee gobolkaas oo mikood Haween tahay;

   b. Maamul Gobolleed walba waxay soo gudbineysaa min hal (1) xubin ayaga oo la tashanaaya Hay'addaha Bulshadda ee gobolkaas;
   c. Laba (2) xubin oo Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran arrimaha Xuquuqul Insaanka oo midkood yahay nafaad;
2. Xubnaha ay soo xulayaan hay'adaha ku xusan faqradda koowaad waa in ay ahaadaan dad sumcad wanaag ku leh bulshada dhexdeeda isla markaana leh aqoon sare.

**Qodobka 16aad:**
**Habraaca Xulista Murashaxiinta**

1. Afar iyo Toban (14) beri guduhood laga billaabo maalinta ay soo dhameystirmeyn xubnaha Guddiga kmg ee xulista Wasiirka u xilsaaran arrimaha Xuquuqul Insaanka waa in uu Guddiga ugu yeeraa fadhigooda rasmiga ah si ay u gudagalaan xil gudashadooda.
2. Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran arrimaha xuquuqul insaanka waa inuu Guddiga xulista murashaxiinta kulamadiisa ugu horeeya u fududeeyaa kuna taakuleeyaa dejinta habraaca howlgalkiisa.
3. Todobo (7) beri guduhood laga billaabo taariikhda guddigu yeeshay kulankiisa koowaad waa in ay ogeysiis tartan furan oo muddo Sodon (30) beri soconeysa jagooyinka iyo shuruudaha laga doonayo xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka ku faafiyaan warbaahinta iyo webseedyada si muwaadiniinta daneynaya codsiga musharraxnimadooda u soo gudbiyaan.
4. Afar iyo Toban (14) beri gudahood ka bilaabata maalinta arji qabashada ku dhamaatey Guddiga waa in uu ku dhameystiraa wareysiga iyo ka baaraandegidda musharaxiinta kuna soo saaraa magacyada Sagaalka (9) musharax ee ku guuleystay una gudbiyaan Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran.
5. Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Xuquuqul Insaanka waa in uu kala diraa Guddiga KMG ee xulista marashaxiinta ka bilaabata taariikhda ay u soo gudbiyaan Sagaalka (9) musharax tartanka furan ku guuleystay, waxaana dib loogu yeeri karaa haddii musharaxiinta ay gudbiyeen gedigood ama qaarkood dib loo soo celiyo.

**Qodobka 17aad:**
**Magacaabista Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka**

1. Afar iyo Toban (14) beri gudahood laga bilaabo taariikhda la soo gaarsiiyey Sagaalka (9) musharax ee ku xusan Qodobka 15 (B) (4) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran arrimaha Xuquuqul Insaanka waa in uu u gudbiyaa Golaha Wasiirrada go'aan uga gaaro.
2. Todoba (7) beri gudahood Golaha Wasiirrada waa in codsigiisa ansixinta u gudbiyaa Golaha Shacabka.

3. Golaha Shacabka waa in uu Afar iyo Toban (14) beri gudahood ku ansixiyaa xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka, haddii Kalfadhiga Goluhu xiran yahayse Afar iyo Tobanka (14) beri ee ugu horeeya Kalfadhiga xiga.
4. Mar hadduu Goluhu ansixiyo xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka Guddoomiyaha Golaha Shacabka waa in uu meelmarinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ugu gudbiyaa Shan (5) beri gudahood ka bilaabata maalinta Goluhu ansixiyey.
5. Haddii qof ama qaar ka mid ah xubnaha magacaaban ee Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka uu Goluhu diido wuxuu Guddoomiyaha Golaha Shacabka dib ugu celinayaa Xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka si xubinta ama xubnaha aan la ansixin ay ugu soo beddelaan ayadoo la raacayo isla habraacii hore ee lagu soo xulay.

## Qodobka 18aad:
## Xilwaayidda Xubnaha Guddiga

1. Jagada xubinta Guddiga waxay jago banaan noqoneysaa haddii ay:
    a. Xubinta xilka istaqaalo ka dhiibto;
    b. Xubinta jabiso xeerka dhaqan shaqo wanaaga;
    c. Xubinta sabab la'aan uga maqnaato shan (5) fadhi oo xiriir ah uu Guddiga yeeshay;
    d. Xubinta xilkeeda xafiiseed ay la gudan weyso karti darro jireed ama maskaxeed awgeed oo ay soo xaqiijiyeen dhakhaatiir lagu kalsoon yahay;
    e. Geeri ku timaaddo;
    f. Haddii ay Maxkamadi ku xukunto xukun ciqaabeed kama dambeys ah
    g. Muddada xil haynta oo dhamaata; iyo
    h. Wixii kale oo xilwaayid ah oo uu tilmaamo Dastuurka Federaalka.
2. Guddigu wuxuu xil ka qaadis ku sameyn karaa xubin kamid ah xubnaha guddiga si waafaqsan Faqradda 1(b), (c) iyo (d) marka ay isku raacaan aqlabiyadda cod seddex meelood labo meel (2/3) ee Guddiga, waxaa go'aan kama dambays ah ka gaaraya Maxkamada khuseeysa;
3. Marka ay banaanaato xilka xubin kamid ah xubnaha guddiga waxaa lagu buuxinayaa si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 19aad:
## Guddi Xeer-beegti

1. Hadba marka loo baahdo Guddigu wuxuu si kmg ah u dhisi karaa Guddi Xeer-beegti ah oo ka garnaqda ama dhexdhexaadisa cabasho la xiriira Xuquuqal Insaanka.
2. Guddiga Xeer-beegtida lagu dhisay Faqradda (1) ee qoddobkan waxay garbeegiddeeda ku go'aamin kartaa magdhow ama waxay soo jeedin kartaa talooyoin dib-u-xaqsoorid ah oo ku haboon xalinta cabashooyinka Xuquuqul Insaan.

3. Go'aamada Xeer-beegtida waxaa dib-u-eegis ku sameyn kara maxkamad sare oo lagu dhisay si waafaqsan Dastuurka Federaalka loona xilsaaray dhageysiga dacwadaha la xiriira xuquuqul insaanka.
4. Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka ayaa dejinaya xeerka iyo nidaamka hagaya howlaha iyo xilgudashda Guddiga xeerbeegtida.

**Qodobka 20aad:**
**Maaliyadda Guddiga**

1. Guddiga wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad u gaar oo ka mid ahaaneysa miisaaniyadda guud ee Qaranka si waafqasan Qodobka 110 (4) ee Dastuurka.

2. Guddiga wuxuu u madaxbannaan yahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyey si waafaqsan shuruucda maaliyadda ee maamulka dowladda.

3. Hantidhowraha Guud ee Dowladda hadba goortii la haboonaato wuxuu xaq u leeyahay in uu hubiyo sida uu guddiga u adeegsaday kharajka iyo maaliyadda xil fulintiisa loogu qoondeeyey.

**Qodobka 21aad:**
**Mushaarka, Gunnooyinka iyo Xuquuqda xubnaha Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga waxay xaq u leeyihiin gunno bileed si waafqsan habraacyada ay xukuumadda Federaalka ku dhaqanto;
2. Xubnaha Guddiga waxay xaq u leeyihiin gunno safar iyo kharajyo kale ay ku bixinayaan markay safar shaqo la xiriira gudashada hawlahooda u aadayaan;
3. Xubnaha Guddiga iyo dhamman hawlwadeennada waxay xaq u leeyihiin bil fasax ah sanadkiiba.

**Qodobka 22aad:**
**Dhaarta Guddiga**

Inta aysan qaban xilka Xafiiska, dhammaan xubnaha Guddiga waxaa Golaha Shacabka hortiisa ku dhaarinaya Guddoomiyaah Maxkamadda Sare dhaarta hoos ku qoran:

**"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diinta, dhowrana Dastuurka Qaranka iyo Shuruucda kale ee Dalka u yaala".**

**Qodobka 23aad:**
**Taageeridda Xilgudashada Guddiga**

1. Dhammaan hay'adaha Dawladeed iyo kuwa gaar ahaanta loo leeyahay iyo dadweynaha Soomaaliyeed waxaa ku waajib ah in ay Guddiga gacan ku siiyaan una fududeeyaan xilgudashadiisa.
2. Waxaa reeban oo gaboodfal ah in la hor istaago habsami u socodka ama curyaaminta howlaha Guddiga inta uu ku gudajiro xilgudashadiisa.

## Qodobka 24aad:
## Dhaqangal Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

## Tusmo:


Qodobka 1aad: Cinwaanka ........ 1
Qodobka 2aad: Macneynta ama Sharraxaada ........ 1
Qodobka 3aad: Aasaaska Guddiga ........ 1
Qodobka 4aad: Xarunta Guddiga ........ 1
Qodobka 5aad: Xilalka iyo Howlaha Guddiga ........ 2
Qodobka 6aad: Awoodaha Guddiga ........ 3
Qodobka 7aad: Qaab-dhismeedka Guddiga. ........ 3
Qodobka 8aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga ........ 4
Qodobka 9aad: Xilalka Xubnaha Guddiga ........ 5
Qodobka 10aad: Agaasimaha Guud ee Guddiga ........ 5
Qodobka 11aad: Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Guddiga ........ 6
Qodobka 12aad: Xasaanadda Xubnaha iyo hawlwadeenada Guddiga ........ 7
Qodobka 13aad: Shaabadda caadiga ah ee Guddiga ........ 7
Qodobka 14aad: Shirarka Guddiga ........ 7
Qodobka 15aad: Guddiga kmg ee Xulista Murashaxiinta ........ 7
Qodobka 16aad: Habraaca Xulista Murashaxiinta ........ 8
Qodobka 17aad: Magacaabista Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka ........ 8
Qodobka 18aad: Xilwaayidda Xubnaha Guddiga ........ 9
Qodobka 19aad: Guddi Xeer-beegti ........ 9
Qodobka 20aad: Maaliyadda Guddiga ........ 10
Qodobka 21aad: Mushaarka, Gunnooyinka iyo Xuquuqda xubnaha Guddiga ........ 10
Qodobka 22aad: Dhaarta Guddiga ........ 10
Qodobka 23aad: Taageeridda Xilgudashada Guddiga ........ 10
Qodobka 24aad: Dhaqangal Sharciga ........ 11